

Iyada oo 1949-ki lagu aassasay Sharci Dejinta Gobalka Washington, Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington wuxuu mas'uul ka hayah maamulida iyo fulinta WLAD (Washington Law Against Discrimination, Sharci Washington ee Lidka Ku ah Takoorka), Cutubka 49.60 ee RCW (Revised Code of Washington, Xeerka Sharciyada Joogtada ah ee Washington).



#### Bayaanka Taarikheed ee Sharci Dejinta

"Cutubkan waa in loo aqoonsado sharciga lidka ku ah takoorka. Waa hawl muujineysa awooda boolis ee gobalka si loo ilaaliyo samafalka dadweyne, caafimaadka, iyo nabada dadka gobalkan, iyo fulinta qoddobada sharci ee Dastuurka dalkan ee la xiriira xuquuqaha madaniga ah. Sharci dejinta waxay ogaatay oo ay cadeeneysaa dhaqanka takoorka ee lagula kacay mid kasta oo kamid ah dadka degan iyada oo ay ugu wakan tahay...[dadka sida gaarka ah takoorka looga ilaaliyo]... waa arin gobalka khuseysa, in takoorka noocas ah uu qalgal geliyo xuquuqaha iyo mudnaanta habboon ee dadka degan balse waxyeeleyneysaa mac'hadka iyo assaaska gobal dimuqraadi ah oo xor ah".

#### Dhaqamada takoorka ee ku saleysan dadka sida gaarka ah takoorka looga ilaaliyo waa sharci darro marki ay ka dhacaan goobahan:

- Shaqada
- Guryaha iyo Hantida Ma-guurtada ah
- Goobaha Dadweynaha
- Deenta iyo Ceymiska

#### Dadka Sida Gaarka ah Takoorka Looga Ilalaaliyo waxaa ka mid ah:

- Isirka/Midabka (oo ay ku jirto noocyada tima hagaajinta)
- Asalka Qaran
- Muwaadinnimada/Xaalada Degenaansho
- Caqiidad
- Jinsiyada/Uurka
- Nooca Jinsiga/Aqoonsiga Jinsiga
- Xaaladda Halyeey Ciidan/Militari
- Muuqashada wax Naafonimo dareen, maskax, ama mid jireed ah oo dhab ah ama mida la isku liido
- Iisticmaalka xayawaanka adeegga
- HIV ama Cagaarshowga
- Xaalada Guur (marki laga reebo goobaha dadweynaha)
- Naas nuujinta (goobaha dadweynaha)
- Da'ada (40 iyo wixi ka wayn, shaqo oo kaliya)
- Qoysaska Carruurta leh (guri kaliya)
- Ahaanshaha War Faafiyaha  
Shaqaalaha Gobalka

Sidoo kale **waa sharci darro in laga aargoosto** qof kasta oo soo gudbiya ama ka qaybqaata dacwad takoor.

#### Adeegsiga Sharciya ee Cadaalada ah

WSHRC (Washington State Human Rights Commission, Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington) waa hay'ad sharci fulin oo dhexdhexaad ah, xaqiiq doon ah; cidna uma doodo inta lagu jiro baaritaanka, balse waxay u doodaan sharciga iyada oo looga dan leeyahay in laga hortago oo la suuliyo takoorka.



#### Hannaanka Dacwada

Qof kasta waxaa waajib ka saaran inuu u hoggaansamo sharciga wuxuuna xaq u leeyahay inuu xaalmarin raadsado marka uu dhib dhaco. Dacwadaha xadgudubyada RCW 49.60 waa in lagu soo gudbiyo lix bilood gudahooda taariikhda uu dhibka dhacay, kiiska uurka waa in lagu soo gudbiyo hal sano gudahiisa; guryaha, dacwada waa in lagu soo gudbiyo hal sano gudhiis; iyo dacwadaha war faafiyaha shaqaalaha, oo lagu soo gudbiyo labo sano gudahooda. Dacwadaha ayaa la xalin karaa inta lagu jiro baaritaanka iyada oo ku xiran heshiis dhex mara kooxaha is haya iyo WSHRC. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka dacwada, booqo boggeena intarnetka ama la xiriir mid ka mid ah xafiisyadeena si aad ula hadasho sargaalka qaabiliaada. **Fadlan inoo sheeg haddii aad u baahan tahay turjubaan ama hooyisiin macquul ah.**

## Waxbarashada iyo Gaarsiinta

Waxbarashada iyo tabbabarka ka hortagga ah waa agab awood leh oo looga hortaggo laguna suuliyo takoorka. Aqoonta sharciga waxay fududeysaa u hoggaansamida iyo adeegsiga xuquuqaha shaqsiyadeed. Qof kasta wuxuu ka faa'iideystaa fahamka cad ee xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha sida ku xusan sharciga. Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington ayaa diyaarin kara hadal-jeedideyaal qabta kulamo waxbarasho, tabbabar toos ah oo gaar ah, iyo bixinta daawacaada, iyo buug-yaraha sharciga lidka ku ah takoorka.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ama si aad wax ka uga su'aasho hagaajinta hadal-jeediye, fadlan la xiriir Xafiiska Wayn.



## Kaalmada Farsamo

Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington sidoo kale wuxuu siyaa kaalmo farsamo hay'adaha dowlada, loo-shaqeeyeyaasha, ganacsiyada, xirfadlayaasha shaqada iyo shaqaalaha, qareenada iyo dadweynaha.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan Washington Law Against Discrimination (Sharciga Washinton ee Lidka Ku ah Takoorka) ama arrimaha fadlan la xiriir Cafiiska Wayn.

## Goobaha Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington

XARUMAH AAWAYN  
711 S. Capitol Way, Suite 402  
P.O. Box 42490  
Olympia, Washington 98504-2490  
360-753-6770

SPOKANE  
Rock Pointe Plaza III  
1330 N. Washington Street, Ste 2460  
Spokane, Washington 99201

YAKIMA  
1205 Ahtanum Ridge Dr., Suite C  
Union Gap, WA 98903

WENATCHEE  
519 Grant Rd  
East Wenatchee, WA 98802



Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, aad qabto su'aalo dheeraad ah, ama aad rabto inaad tabbabar u qabato hay'adaada, fadlan kala xiriir WSHRC lambarka 360-753-6770 ama 800-233-3247. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan midan iyo arrimaha kale ee xuquuqaha madaniga ah waxaa laga heli kaa boggeena intarmetka ee barta

[www.hum.wa.gov](http://www.hum.wa.gov)

## Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington



*Himilada Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington waa inuu ka hortaggo oo uu suuliyo takoorka iyada oo loo marayo adeegsiga sharciga ee cadaalada ah, isticmaalka kheyraadka ee hufan, iyo gacansaar la yeelashada bulshada ee waxtarka leh.*